

SHARCIYADA NABADGELYADA BASKA

Waalidiinta: fadlan la fiirfiiri cunugaada sharciyadaan intuusan iskuulka bilaabanin.

Marka loo socdo meesha baska uu istaagayo:

- 1 – Istaagnow meesha socodka loogu talagaley, wadada ka goo geesaha oo keliya.
- 2 – Ka hormar ugu yaraan shan daqiiqo intuusan baska imaan.
- 3 – Nabadgelyada awgeed imaaw meesha baska uu istaago ka hor inta uusan imaanin baska, haddii aad soo daahdid oo aad imaatid is – goyska wadada marka baska uu imaanaayo, sug(ha soo goynin) ilaa uu baska ka istaago oo darawalka kuu sameeyo calaamadda aad ku soo goyn lahayd wadada.
- 4 – Iska ilaali dadka laga shakiyo(qof yar, qof weyn, lab, dhedig) oo maraya ama gaari ku dhaxjira, dadkaa oo kale haddii aad aragtid u sheeg darawalka ama madaxa iskuulka, xataa haddii uu baska kaa tago ha ka ogalaanin qof aadan garaneynin in uu ku qaado.

Marka baska la sugay:

- 1 – Istaag meel wadada u jirta ugu yaraan toban fiid(cag)
- 2 – Ixtiraam hantida baska saaran.
- 3 – Had iyo jeer isticmaal luqad ixtiraam leh.
- 4 – Ka leexo inaad xayirtid wadada lagu socdo.
- 5 – Ixtiraam ardeyda kale, adigoon riixeynin, cariirineynin ama aadan la dagaalamaynin.

Marka baska la raacayo:

- 1 – Istaagnow ilaa baska uu si buuxda u istaago, in qof laga riixo safka dhaxe ama safka meesha uu ku dhamaado waxay qofka ugu horeeya safka u soo tuuri kartaa dhanka baska ama lugaha gaariga hoostooda.
- 2 – Salaan darawalka ka dibna aad(u dhaqaaq) meesha ugu gadaalaysa gudaha baska inta aadan fariisan.

Marka baska laga degaayo:

- 1 – Ka deg baska una dhaqaaq ilaa toban fiid meel baska u jirta.
- 2 – Istaagnow meeshaada ilaa darawalka uu muujiyo calaamad aad wadada ku goyn lahayd si nabadgelyo leh.
- 3 – Markaa ka dib u soco dhanka hore ee baska, iska fiiri wadada. labadeeda dhinac, haddii aan gaari soo socin u gooy wadada dhanka kale